



## Xaqiijinta xaq-u-yeelashadaada Apple Health

Ka-dib marka aad codsato ama dib-u-cusboonaysiiso caymiskaaga Apple Health (Medicaid), waxaad heli kartaa warqad kaa codsaneysa macluumaad dheeraad ah oo lagu xaqiijinayo xaq-u-yeelashadaada. Tani waxaa loo yaqaanaa Dib-u-eegista Xaq-u-yeelashada Kadib (PER).

### Waa maxay Dib-u-eegista Xaq-u-yeelashada Ka-dib

Dib-u-eegisyada Xaq-u-yeelashada Ka-dib (PER) waxay ka caawiyaan Maamulka Daryeelka Caafimaadka (HCA) xaqiijinta xaq u yeelashadaada caymiska Apple Health. PERs waxay gaar ku tahay Apple Health oo loogu talagalay dadka waaweyn, carruurta, haweenka uurka leh, iyo waalidiinta/daryeelayaasha, ee loo yaqaanno barnaamijyadeenna Hagaajinta Dakhliga Guud ee Wax-laga-beddelay (MAGI). Barnaamijyadan waxaa laga codsadaa Washington Healthplanfinder.

Xaq-u-yeelashada Apple Health ayaa la go'aamiyaa iyadoo la adeegsanayo macluumaadka aad gelisay codsigaaga Washington Healthplanfinder. Xaqiijinta loo marayo PER ayaa loo baahan karaa marka macluumaadka codsiga uusan la jaanqaadi karin kayd-xogeedka gobolka ama federaalka. PERs waxaa buuxiya shaqaalaha Maamulka Daryeelka Caafimaadka si loo xaqiijiyo xaq-u-yeelashada ku saleysan dakhligaaga, jinsiyadaada, ama joogitaankaaga sharciga ah.

**Tusaale:** Waxaad sheegaysaa in dakhligaagu uu yahay \$1,000 oo aad bishii ka hesho shaqada, laakiinse Waaxda Damaannada Shaqada (ESD) waxay muujinaysaa dakhligaaga in uu yahay \$1,850 bishii. Tani waxay maamulka HCA ku wargelinaysaa in ay kuu soo dirto warqad codsaneysa xaqiijinta dakhligaaga.

Mararka qaarkood shaqaaluhu waxay adeegsan karaan macluumaadka ku jira kayd-xogeedka gobolka iyo federaalka si loo xaqiijiyo xaq-u-yeelashadaada iyo cusboonaysiinta codsigaaga ee ka tarjumaya xaaladda ama dakhligaaga hadda. Waxaad heli doontaa warqadda codsiga macluumaadka (ama email ku xiran dookhaaga) haddii aanan awoodin xaqiijinta xaq-u-yeelashadaada. Waxaad heli doontaa 15 maalmood oo aad ku bixinayo macluumaadka warqadda lagu codsadey. Caymiskaaga waa la xiri karaa haddii aadan bixin macluumaadka la codsadey taariikhda la filayo.

### Maxay tahay sababta la ii weyddiiyo in aan bixiyo xaqiijinta dakhliga?

Waxaa dhowaan lagu oggolaaday caymiska Apple Health iyadoo loo marayo Washington Healthplanfinder ama waxaad dib-u-cusboonaysiisay caymiskaaga Apple Health ee jira iyo macluumaadka ku jira kayd-xogeedka gobolka ama federaalka ma waafaqsana macluumaadka dakhliga lagu bixiyay codsigaaga.

Eeg Xeerarka Maamulka ee Washington (WAC) si aad u oggaato wax badan oo ku saabsan sababta lagu weyddiiyay in aad macluumaadkan bixiso:

- [Dakhliga \(qaybta 1\)](#)
- [Dakhliga \(qaybta 2\)](#)
- [Inta qof ee uu qoysku ka kooban yahay](#)

## Ma u baahanahay in aan ka jawaabo warqadda lagu codsanayo xaqiijinta haddii aan hadda cusboonaysiiyay macluumaadkeyga?

Haa. Haddii aad codsatey ama dib-u-cusboonaysiiyay caymiska Apple Health oo aadna heshay warqad weyddiinayso macluumaad dheeraad ah, waxaad u baahan tahay in aad ka jawaabto si aan u xaqiijino xaq-u-yeelashadaada. Caymiskaaga ayaa xirmi kara haddii aadan ka jawaabin, xitaa haddii aad heshay warqad oggolaansho.

## Ma u baahanahay in aad u diro dakhli xaqiijin qof walboo Reerkeyga ka tirsan?

Haa. Kuwani waxaa ka mid ah:

- Naftaada,
- Xaaskaaga ama waalidka aad waalidnimada wadaagtaan haddii aad wada nooshihiin ama aad canshuurta u wada gudbisataan sida dad isqabo ahaan, iyo
- Qof walboo canshuur ku tiirsan haddii dakhligoodu uu ka soo baxo heerka aasaasiga ah ee canshuur xareynta IRS.
  - Eeg tilmaamayaasha [Adeegga Dakhliga Gudaha](#) haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dakhliga canshuur ku tiirsanaanta

## Sideen ku oggaadaa dokumentiyada la soo gudbinayo si aan dakhligeyga u xaqiijiyo?

Eeg shaxaha hoose si aad u oggaato wax badan oo ku saabsan noocyada dokumentiyada la soo gudbinayo oo ku saleysan dakhligaaga.

Nooca dakhliga	Noocyada xaqiijinta ee la aqbali karo
Dakhli la'aanta heerka aasaasiga ah	Warqad ka socota loo-shaqeeyaha oo ku qoran magaca loo shaqeeyaya iyo maalintii ugu dambeysay ee la shaqeeyay Bayaan qoraal ah ama afka ah oo sheegaya in aadan lahayn dakhli iyo taariikhdiis ugu dambeysay ee aad shaqeysay
Dakhliga la kasbadey (dakhliga ka yimaada shaqada, oo ay ku jiraan bakhshiiska iyo faa'iido wadaagga)	Nuqulka dhammeystiran ee dhammaan gumadyada ka soo hara jeega mushaarka ee 60-kii maalmood ee ugu dambeeyay; ama Warqad uu saxiixay kuna taariikheysan loo-shaqeeyahaaga oo lagu darayo talooyinka, saacadaha toddobaadka ee la shaqeeyay, mushaaraadka saacadlaha ah, iyo inta jeer ee la bixiyio.
Dakhliga iskaa-u-shaqeysiga Dakhliga kirada Dakhliga beeraha	Nuqulka dhammeystiran canshuur-celintaadii ugu dambeysay oo ay ku jiraan dhammaan jadwallada iyo lifaaqyada haddii ay tahay metelaadda wanaagsan ee dakhligaaga hadda ee sannadka oo dhan; ama Bayaanka khasaaraha iyo faa'iidada ee 3-dii bilood ee ugu dambeeyay oo ay ku jiraan dakhliga guud ee ganacsiga ee bil kasta, lacagaha la oggol yahay in laga jaro ee IRS, iyo dakhliga saafiga ah ee ganacsiga
Dakhliga Damaannada Bulshada Faa'iidooyinka shaqo la'aanta Dakhliyada raasumaalka ah Dakhliga saamiga faa'iido wadaagga Dakhliga IRA/401K Dakhliga hawlgabka/lacagta sannadlaha ah Dakhli dulsaar Dakhliga qabiilka ee la canshuuri karo Dakhliga milkiilaha Masruuf/taageerada xaaska Dakhli laga helo ammaah Dakhli ajnabi Hawl-gabka waddada tareenka Dakhliga kale ee la canshuuri karo	Nuqulka dhammeystiran ee canshuur celintaada ugu dambeysay oo ay ku jiraan dhammaan jadwallada iyo lifaaqyada

## Sideen ku oggaadaa dokumentiyada la soo gudbinayo si aan u xaqiijiyo lacagaha la iga jarayo?

Eeg shaxaha hoose si aad u oggaato wax badan oo ku saabsan noocyada dokumentiyada la soo gudbinayo oo ku saleysan lacagaha lagaa jarayo.

Lacag kajirdda ay IRS ogoshahay (ku khasban beddel iyo xaddidaado ku saleysan sharciyada canshuurta IRS)	Noocyada xaqiijinta ee la aqbali karo
Canshuurta iskiis u-shaqaystaha Qorshaha hawlgabka iskiis-u-shaqaystaha Ceymiska caafimaadka iskiis-u-shaqaystaha Canshuurta hore ee tabarucaadaha xisaabta hawl-gabka Tabarucaadaha akoonka kaydka caafimaadka (HSA) Kharashaadyada ganacsiga qaarkood ee la sheegan karo Masruuf/taakulaynta lammaanaha ee ay maxkamaddu amartay ka hor 01/01/2019 Ganaaxa lagu soo rogo kaydada waqtiga hore lala baxo Kharashaadyada guurista ee loogu talagalay xubnaha ka tirsan ciidamada qalabka sida Kharashaadyada baraha/macallinka Dulsaarka deynta ardayga Lacagta waxbarashada ardeyga	Nuqulka dhammeystiran ee canshuur-celintaadii ugu dambeysay oo ay ku jiraan dhammaan jadwallada iyo lifaaqyada haddii ay tahay metelaadda wanaagsan ee lacagaha sannadkii laga jaro; ama Foomamka IRS (1098T, 1098E); ama Bayaanka bilaha ama saddexdii biloodba mar ah ee laga helay isha ka-jaridda; ama Rasiidyada laga helay isha

## Sidee u soo gudbiyaa dokumentiyadeyda?

- **Barta internet-ka:** [Washington Healthplanfinder](#)
  - Soo-gal akoonkaaga ka-dibna soo geli dokumentiyada xarunta dokumentiyada (document center)
- **Abka telefoonka gacanta:** [Abka WAPlanfinder](#) (oo laga heli karo aaladaha iOS iyo Android)
- Soo-gal ka-dibna dooro 'Xarunta Dokumentiga/Document Center' si aad u soo gudbiso sawirka dokumentigaaga
- **Email:** [Qaybta Raajada ee HCA Apple Health](#)
- **Fakis:** 1-855-867-4467
- **Boostada:** Health Care Authority  
P.O. Box 45531  
Olympia, WA 98504-5531

## Maxaa dhacaya haddii aanan bixin xaqiijinta dakhliga marka loo baahan yahay?

Haddii macluumaadka aan la bixin taariikhda loo baahan yahay, shaqaalaha HCA ayaa isku-dayi doona go'aaminta xaq-u-yeelashada Apple Health oo lagu saleynayo macluumaadka ku jira nidaamyada gobolka iyo federaalka. Haddii aanay awoodin go'aaminta xaq-u-yeelashadaada, HCA waxay joojin kartaa caymiska Apple Health ama u beddeli kartaa caymiska barnaamij kale (oo uu ku jiro barnaamij ku saleysan lacagaha joogtada ah ee caymiska).

## Waqti intee le'eg ayaan haystaa si aan macluumaadka u bixiyoo?

Waxaad haystaa 15 maalmood laga soo bilaabo taariikhda aan boostada kuugu soo dirnay warqadda codsiga macluumaadka si aad uga soo jawaabto. Taariikhda la filayo waxay sidoo kale ku qoran warqadaada. Haddii aad u baahan tahay waqti dheeraad ah oo aad ku bixinayso macluumaadka la codsadey, waxaad tani codsan kartaa adigoo email u diraya [HCA Weyddii MAGI](#) ama adigoo wacaya 1-800-562-3022.

## Farriimaha qoraalka ah ee codsiga macluumaadka

### Dib-u-eegisyada Xaq-u-yeelashada Kadib

Macaamiisha Apple Health (Medicaid) waxaa laga yaabaa in ay heleen farriimaha qoraalka ah ee soo socda haddii ay u baahan yihiin in ay soo gudbiyaan dokumentiyo dheeraad ah si loo xaqiijiyo dakhligooda.

Diiwaannadeenu waxaa ay muujinayaan adiga ama wakiilkaaga idman (AREP) in aad ina siiseen lambarkaaga telefoonka. Waxaan u baahannahay adiga ama wakiilkaaga idman (AREP) in aad soo gudbisaan xaqijinta dakhligaaga. Haddii aad dhowaan heshay lambarkan telefoonka oo aadanna ahayn macaamiil Apple Health, waxaad ku jawaabi kartaa “STOP” si aadan u helin farriimo kale.

#### Farriinta #1

“Apple Health (Medicaid): Inta jeer ee farriimaha la diro way kala duwan tahay. Kharashaadka farriimaha iyo xogta ayaa laga yaabaa in ay ku dabaqmaan. Ka jawaab adiga oo qoraya STOP si aad uga baxdo. Si aad u hesho caawimo ama u eegto T&Cs, booqo [hca.wa.gov/income-docs](https://hca.wa.gov/income-docs)”

#### Farriinta #2

Xusuusin: Hadda tallaabo qaad si aad caymis u lahaato. Haddii aadan horey u galin, gudaha u gal [wahealthplanfinder.org](https://wahealthplanfinder.org) si aad u eegto warqadda oo aad u soo geliso dokumentiyada.

### Miyaa horey loo xiray?

Waxaad heli kartaa farriimahan qoraalka ee soo socda haddii caymiskaaga hore loo xiray iyadoo sababtu tahay in aadan ka soo jawaabin oo annagana aan buuxin karin arjigaaga. Waxaan u baahan nahay macluumaad dheeraad ah ka hor inta aanan xaqiijin u-qalmitaankaaga.

#### Farriinta #1

“Apple Health (Medicaid): Inta jeer ee farriimaha la diro way kala duwan tahay. Kharashaadka farriimaha iyo xogta ayaa laga yaabaa in ay ku dabaqmaan. Ku jawaab STOP si aad uga baxdo. Si aad u hesho caawimo ama u eegto T&Cs, booqo [hca.wa.gov/income-docs](https://hca.wa.gov/income-docs)”

#### Farriinta #2

Xusuusin: Hadda tallaabo qaad si aad mar kale u furto caymiska. Haddii aadan horey u galin, gal gudaha [wahealthplanfinder.org](https://wahealthplanfinder.org) si aad u eegto warqadda iyo si aad u soo geliso dokumentiyada.

## Su’aalaha inta badan la isweydiyo

### Waa maxay lambarka ay farriinta qoraalka ah ka imaanayso?

HCA ayaa farriimaha qoraalka ka soo direysa 833-772-9017.

### Ka waran haddii aanan haysan caymiska Apple Health?

Haddii aadan haysan Apple Health, waxaa ay u badan tahay in aan haysano lambar telefoon hore ama mid khaldan oo uu leeyahay qof haysta. Looma baahna in aad qaado wax tallaabo ah waxaadna ka jawaabi kartaa adiga oo qoraya “STOP” si aadan u helin farriimo qoraal ah oo dheeraad ah.

Waxaad haysataa Apple Health haddii aad haysato kaarka adeegyada ProviderOne oo shaqeynaya ama laguugu qoondeeyay qorshaha daryeelka la maareeyay. Qorsheyaasha daryeelka la maareeyay waa:

- Qorshaha Caafimaadka Bulshada ee Washington
- Daryeelka La Isuduway
- Molina Healthcare ee Washington
- Qorshaha Bulshada UnitedHealthcare ee Washington
- Wellpoint Washington (horey loo oran jiray Amerigroup)

### Intee jeer ayaan heli doonnaa farriinta qoraalka ah?

Waxaad heli doontaa farriin qoraal ah marka aad haysato dokumenti dakhli oo aad u baahan tahay in aad soo gudbiso. Waxaa sidoo kale laga yaabaa in aad hesho farriin qoraal ah marka la gaaro waqtigii la sameyn lahaa dib-u-eegista dib-u-cusboonaysiintaada ama xaq-u-yeelashadaada. Haddii aad doorato in aad ka hesho farriimo qoraal ah qorshahaaga daryeelka la maareeyay, waxaa ay sidoo kale kuu soo diri karaan farriin qoraal ah.

### Ka waran haddii aanan rabin farriimo dheeraad ah?

Ka jawaab farriinta qoraalka ah adiga oo qoraya “STOP” si aadan mar dambe u helin farriimo qoraal ah.

### Waxaan helay farriin qoraal ah oo sheegaysa in aan lacag ku bixiyo telefoonka si aan caymiskeyga u lahaado. Ma rubnaa warkaasi?

HCA, DSHS, iyo Washington Healthplanfinder marnaba kaama codsan doonaan lacag si laguugu qoro ama lagaaga saaro caymiska Apple Health. Dad khiyaameeya dadka ayaa fariimo qoraal ah u diraya iyo wacaya macaamiisha iyadoo u sheegaya in ay lacag bixiyaan si ay u cusbooneysiyaan caymiskooda Medicaid. Hala wadaagin macluumaadkaaga bankiga ama kaarka amaahda qof sheeganaya in uu ka socdo HCA, DSHS, ama Apple Health.

Haddii telefoonka lagaa soo waco ama farriin qoraal ah lagu soo diro oo aad u maleyso in ay khiyaanno yihiin, telefoonka ku jar hana u jawaabin. Waxaad cabashooyinka khiyaannada suuragalka ah ugu gudbin kartaa HCA:

- **Email:** [WAH Eligibility Fraud](#)
- **Farriin codeed:** 360-725-0934
- **Fakis:** 360-725-1158, Attn: WA Apple Health Fraud

### Kumaan la xiriiraa haddii aan su’aalo qabo?

Apple Health (Medicaid): Ka wac adeegga macmiilka Apple Health 1-800-562-3022 ama emailkan [Ask MAGI](#).

## Shuruudaha iyo Xaaladaha

### Asturnaanta adeegsadaha

Hay'adda Daryeelka Caafimaadka ee Gobolka Washington marnaba uma wadaagi doonto umana isticmaali doonto lambarkaaga moobaylka ama telefoonka gacanta ujeeddo kale oo aan ahayn cusboonaysiinta laga helo macmiilka la doortay.

### Ujuurrooyinka adeegsadaha

Hay'adda Daryeelka Caafimaadka ee Gobolka Washington kama qaado lacag dadka hela farriimaha qoraalka ah. Haseyeeshee, kharashaadka farriimaha iyo xogta ayaa laga yaabaa in ay ku dabaqmaan.

### Inta jeer ee la sameeyo

Inta jeer ee farriimaha la diro way kala duwan tahay.

### Ka-bax

Si aad uga baxdo (jooji helidda farriimaha), ka jawaab adiga oo STOP ka diraya telefoonkaaga gacanta. Waxaan ka-bixidaada ku xaqiijin karnaa farriin qoraaleed oo wax farriimo dheeraad ah kama heli doontid Hay'adda Daryeelka Caafimaadka ee Gobolka Washington haddii aad mar kale gasho mooyaane.

### Damaannad

Hay'adda Daryeelka Caafimaadka ee Gobolka Washington mas'uul kama aha dib-u-dhac kastoo ku yimaada helitaanka fariimo SMS kasta ee la xiriira barnaamijkan. Gaarsiinta fariimaha SMS waxaa ay ku xiran tahay gudbinta wax-ku-oolka ah ee bixiyahaaga adeegga wireless-ka / hawl-wadeenka shabakadda. Shirkadaha qaada ama gudbiya farriimaha mas'uul kama aha fariimaha dib u dhaca ama aan la gaarsiin.

### Sharaxaadaha kiisaska isticmaalka

Hay'adda Daryeelka Caafimaadka ee Gobolka Washington waxaa ay diri doontaa fariimaha SMS ee la xiriira macluumaadka iyo ogeysiisyada ku saabsan adeegyada dowladda ee ay bixiso Hay'adda Daryeelka Caafimaadka ee Gobolka Washington.

### Su'aalo?

Haddii aad qabto su'aalo ama dhibaatooyin ama aad u baahan tahay caawimaad, fadlan la xiriir [Granicus support](#).

## Siyaasadda Asturnaanta

Hay'adda Daryeelka Caafimaadka ee Gobolka Washington ayaa ilaalinaysa asturnaantaada. Waxaan kaliya u isticmaali doonnaa macluumaadka aad bixiso in aan ku soo gudbino farriintaada qoraalka ah. Si kastaba ha ahaatee, mar walba waxaan xaq u leenahay in aan shaacino macluumaad kasta haddii loo baahdo si loo raaco sharciga, xeer-nidaamiyaha, ama codsiga dowladda, looga fogaado mas'uuliyad, ama si loo ilaaliyo xuquuqaheenna ama hantideenna.

Marka aad barta internet-ka ka buuxiso foomamka ama si kale aad hay'ad u siiso macluumaad la xiriira adeegga farriimaha wireless-ka, waxaad oggolaaneysaa in aad bixiso macluumaad sax ah, dhammeystiran, oo run ah. Waxaad oggolaaneysaa in aadan adeegsan magac been-abuur ah ama magac aadan oggolaansho u haysan in aad isticmaasho. Haddii annaga, oo go'aanka iska leh, aan aaminno in macluumaad kasta oo noocaas ahi uu yahay mid aan run ahayn, khaldan, ama aan dhammeystirnayn, waxaan kuu diidi karnaa in aad adeegga hesho oo aad qaado tallaabo kasta oo sharci ah oo ku habboon.